

## SHAQADA QOYSKA IYO DARYEELAHA:

Sibteembar 2020

### Taageerada Waxbarashada Carruurta Ingiriiska Barta Inta aad Cunto wada samaynaysaan

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

*Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES*

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Carruurta waxay dhisi karaan eray bixintooda ayagoo baranaaya kuna hadlaaya erayada cusub ee shaqooyinka maalin kasta sida samaynta cunto. Shaqadaan waxaad cuntada la diyaarinaysaa cunugaaga, adinkoo diirada saaraaya hanaanka iyo erayada cusub, waxaadna ka caawinaysaa qorista liiska maadooyinka cuntada.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis, hadba kii kuugu xoog badan adigga.
- Ku barashada erayada cusub luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!

## Maxaan u barayaa erayada ku saabsan diyaarinta cunto?

Ku hadalka, akhrinta, iyo qorista erayada cusub maalin kasta ayaa ka caawisa carruurta inay dhisaan eray bixintooda.

### Aan cunto karino!

Raac tallaabooyinka soo socda. Aan gadaal ka eegno taageerooyinka luuqada oo dheeraad ah.

**Talaabada 1 aad:** La hadal cunugaaga islamna hadla, **dooro cunto aad samaysaan.** Tusaalayaasha: *Quraac, qado, casho, ama cunto fudud oo aad jeceshahay.*



▶ **Talaabada 2 aad:** Kahor intaadan bilaabin karinta cuntada, ka caawi cunugaaga inuu **qorto maadooyinka cuntad alaga samaynaayo** iyo tirada maado kasta. Qeex maadooyinka cusub ee cunugaagu baran karo. Waxaad adeegsan kartaa erayada qeexitaanka ee ku qoran dhabarka danbe ee bogga. Ka hadal maadooyinka cuntada iyo cabirada inta cunugaagu qoraayo. Tusaale: *Qaado cusbo ah waxay doolshaha ka dhigaysaa mid cusbo kasoo dhadhanto. Qaadada shaaxa ayaa yar ayada ayaana cabirka saxda ah leh.*

**Talaabada 3 aad:** U sheeg cunugaaga **inuu qoro dookhyada talaabooyinka iskudarka cuntada** intaad wado diyaarinta cuntada. Adeegso erayada taxanayaasha iyo ficilada u qoran dhabarka danbe ee bogga.

**Talaabada 4 aad:** U sheeg cunugaaga inuu **dib kuugu akhriyo maadooyinka** cuntada.

**Talaabada 5 aad: Ku raaxayso la cunista cuntada** cunugaaga! Ka hadal maadooyinka cuntada. Adeegso wrayada cabirka, isku xigida, iyo talaabada, gaar ahaana kuwa ku cusub cunugaaga.



▶ **Tababarka:** La diyaari buuga maadooyinka cuntada cunugaaga! Maado cunto kasta u sheeg inuu qoro waxyaabaha lagu daraayo, cabirada, iyo hananaka cunto karinta kadibna ha kuu akhriyo mid kasta.

**Xujada Xisaabta:** U sheeg cunugaaga inuu labo jibaar ka digo maadada cuntada, ama uu labo nus u kalajaro.

Shaqada Qoyska iyo Daryeelaha: Taageerada Waxbarashada Carruurta Ingiriiska Barta Inta aad Cunto wada samaynaysaan

Waad ka caawin kartaa cunugaaga barashada erayo cusub adoo adeegsanaaya erayada cunto karinta ee ku qoran boggaan.

### Erayada Cabirka

- Qaadada shaaxa/Qaadada Cuntada
- Wiqiyado/Garaamyoo/Boon/Kiilo Garaam
- Koob/Rodol/Liitar
- Far iyo suul/Cantoobo



### Erayada Isxig-xiga/Kala horaynta

- Koobaad/Labaad/Ugu danbeeya
- Xigga
- Kadib

### Erayada Ficilka

- Jar/Oodkac/Jeex
- Qoo (boqoashaa la qalajiyay)/Mariate (hilib)
- Fur (qasab ama dhalo)
- Jabi/Dilaaci (ukun)
- Ku dar (maadooyinka cuntada)/Ku shub (maadooyinka cuntada)
- Walaaq (gudaha)/Qas (gudaha)/Isku dar
- Kululee/Kari/Hogee/Shiil
- Ka saar (dabka)
- Dabool saar/ka Qaad (digi)
- Marmari (marax, subag, subaga lawska)

### Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Waxaad adeegsan kartaa su'aalaha iyo jawabaaha hoose inta adigga iyo cunugaagu karinaysaan aadna wadaagaysaan cuntada.

Su'aalaha Qoyska iyo Daryeelaha	Jawaabaha Ilmaha
Waa maxay cuntada aad ugu jeceshahay? Sababta?	Cuntada aan ugu jeclahay waa ____ waayo ____.
Waa maxay maadooyinka aad doonayso in cuntadaan lagu daro?	Maadooyinka aan u baahan nahay waa ____.
Maxaan u baahan nahay inaan marka koobaad samayno?	Waxa koobaad ee ay tahay inaan samayso si aan cunto u samayno waa ____.
Maxaan samaynayn doonaa marka xigta?	Marka xigta waxaan ____.
Waa maxay maadooyinka cuntada ee aad dhahamin karto marka aad cunto cunto?	Waxaan dhahamin karaa ____ (basasha, oregano, qorfaha).
Sidee ayay cuntada (ama maadada cuntadu) usoo urtaa?	Cuntada ____ waxay u uraysaa [sida] ____.
Haddii aad awoodo, ma badali lahayd maadada cuntada lagu daray marka xigta?	Marka xigta waxaan ku dari doonaa ____ dheeraad ah (sonkorta baroonka) waxaana ku yarayn lahaa ____ (basasha).

Xogtaan waxaa lagu diyaariyay Heshiiska ED-IES-17-C-0012/8/9 waxaana diyaarshay Shaybaarada Waxbarashada Gobalka ee Galbeedka, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha, iyo Waqooyi Galbeed. Qoraalku kama dhigma fikradaha ama siyaasada IES ama Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, mana sheegaayo magacyada ganacsiga, badeecooyin ganacsi, ama ururo dhiiri ay siinayso Dawlada Maraykanka.